GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA
IYO LA-SOCODKA
HIRGELINTA DASTUURKA

# SOOJEEDIN

## WAX-KABEDDEL KOOBAN

## OO KU SAABSAN QODOBBADA 49AAD, 50AAD IYO 54AAD EE CUTUBKA 4AAD EE DASTUURKA.

JANNAAYO 2026

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA
IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**ANSIXIYEY:**

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LASOCODKA
HIRGELINTA DASTUURKA

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu diyaariyay, kaddib heshiiskii xukuumadda Federaalka iyo mucaaradka oo la gaaray Agoosto 26, 2025, soojeedinta wax-kabeddelka Qodobbada 49aad, 50aad iyo 54aad ee Cutubka 4aad oo uu horay u ansixiyay Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Maarso 30, 2024.

Qodobbadan hoos ku xusan oo saameyn mug leh ku yeeshay soojeedimaha wax-kabeddelka Cutubyada 6aad, 7aad iyo 8aad oo loo soo gudbinayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah. Sidaas daraadeed, GMDHD waxaa uu qaybtan hoose ku soo gudbinayaa soojeedinta wax-kabeddelka qodobbada kor ku xusan si waafaqsan Cutubka 15aad ee Dastuurka KMG ah.

| CUTUBKA AFARAAD: MATALAADDA SHACABKA | | |
|---|---|---|
| **Cutubyada la ansixiyay Maarso 30, 2024** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD ansixiyayna Guddiga Lasocodka** | **Faallo** |
| **Qodobka 49aad: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo** | **Qodobka 49aad: Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo** | Cinwaanka Qodobka 49aad waxba lagama beddelin |
| 1) Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa: | (1) Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa: | Faqraddan waxba lagama beddelin |
| a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare; | (a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare; | xarafkan waxba lagama beddelin |
| b) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo magcaabaya xilkana ka qaadaya Ra'iisul Wasaaraha. | | Faqraddan waa la tiray, nuxurkeeda waxaa loo raray oo lagu kala daray:<br>- Cutuka 6aad, Qodobka 96(a).<br>- Cutubka 7aad, Qodobka 114(1).<br>- Cutubka 8aad, Qodobka 128(1). |
| c) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka. | | Faqraddan waa la tiray Cutubka 5aad, Qodobka 69(1). |
| d) Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka; iyo | (b) Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka; iyo | xarafkan waxba lagama beddelin |
| e) Golaha Deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee Dawladaha hoose. | (c) Golaha Deegaanka ee Dawladaha hoose. | Faqraddan waxa laga tiray "duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee" |
| 2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | (2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka | Faqraddab waxba lagama beddelin |

| | | |
|---|---|---|
| Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye; | |
| 3) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | (3) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Faqraddan waxba lagama beddelin |
| 4) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan; | | Faqraddan waa la tiray, waxaana loo raray cutubka 6aad (Qodobka 93(5)(a)). |
| 5) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka; waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | | Faqraddan waa la tiray, waxaana nuxurkeeda loo raray cutubka 5aad, Qodobka 61(1). |
| 6) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleed kasta waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | (4) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleed kasta waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye; | Faqraddan waxba lagama beddelin |
| 7) Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye. | (5) Golayaasha deegaanka waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye. | Faqraddan waa la tiray "duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada |

| Qodobka 50aad: Muddada Xilhaynta | Qodobka 50aad: Muddada Xilhaynta | |
|---|---|---|
| 1) Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 49aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano. | Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 49aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano. | Faqraddan waxba lagama beddelin |
| 2) Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, sida ku qeexan xeerka doorashooyinka | | Faqraddan waa la tiray, nuxurkeeda waxaa lagu xusay Xeerka Doorshooyinka. |
| **Qodobka 54aad: Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed** | **Qodobka 54aad: Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed** | Cinwaanka Qodobka 54aad waxba lagama beddelin |
| 1) Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed ee ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha; | Doorashooyinka hay'adaha kala duwan waxaa ku tartamaya xisbiyada siyaasadeed ee sida rasmiga ah uga diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha. Baarlamaanka Federaalka ayaa soo saaraya xeer faahfaahinaya habraaca diiwaangelinta ururrada iyo xisbiyada siyaasadeed, ayadoo ururkii hela 10% ee tirada xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu noqonayo xisbi qaran. | Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib-u-siiqayn, waxaana lagu soo daray nuxurka faqradda 2aad ee isla qodobkan. |
| 2) Saddex urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta. | | **Faqraddan waa la tiray**, nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 1aad ee isla qodobkan. |

GMDHD

ICRIC